

Doorashada inaad noqotid bukaan shakhsii ahaaneed

Marka lagu dhigo Austin Health waxaa lagu weydiin doonaa inaad leedahay caymis caafimaad oo shakhsii ah. Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo shakhsii ah, waxaa lagu weydiin doonaa inaad kala dooratid in lagu dhigo bukaan dadweyne ama mid shakhsii ah.

Doorashada inaad noqotid bukaan-jiif dadweyne

Si laguugu dhigo bukaan dadweyne ahaan waxaad u baahan doontaa inaad haysatid kaadhka Medicare oo sax ah. Haddii lagugu dhigo bukaan dadweyne ahaan Austin Health, waxaa jiri kara kharashyo la xidhiidha gelitaankaaga kuwaas oo hoos lagu sharaxay.

Doorashada inaad noqotid bukaan-jiif gaar ah

Si laguugu dhigo bukaan gaar ah, waxaad u baahan doontaa caymis caafimaad oo gaar ah. Haddii aad dooratid inaad ku isticmaashid caymiskaaga caafimaadka gaarka ah Austin Health:

- Wax kharash ah oo 'jeebka ka baxsan' laguguma dallaci doono (lacag-bixinnada faraqa) joogitaanka bukaan-jiifka oo ay ku jiraan hoyga cusbitaalka, daryeelka caafimaadka, baadhista ogaanshaha ama adeegyada sanaaciga
- Wuxaan dabooli doonaa wixii dheeraad ah ama lacag-wadaag ah oo ay dalbato khasnaddaada caafimaadka gelitaankaaga, haddii xad-dhaafkaaga la xisaabiyo sannad kasta waxaad kaydin kartaa lacag kharashyada xad-dhaafka ah mustaqbalka isla sanadkaas.
- Lacagta aan ka helno caymiskaaga caafimaadka gaarka ah waxay si toos ah u tageysaa cusbitaalka. Waxaa loo isticmaalaa in lagu wanaajiyoo hoyga, la maalgeliyo qalab cusub, la qoro shaqaale takhasus leh iyo maalgelinta cilmi baadhista.

Waa maxay kharashyada ku lug leh inta aan joogo?

Kharashyada soo socda waxaa **bixinaya dhammaan bukaannada**:

- Telefishin (haddii la isticmaalo)
- Dawada la bixiyo
- Kiraynta/iibsiga qalabka (haddii loo baahdo)

Dhammaan bukaannada waxay u baahan yihii inay iska bixiyaan Kharashka dawadooda marka la siiyo. Haddii aad haysatid kaadhka hawlgabka, kaadhka daryeelka caafimaadka ama nambarka badbaadada, u sheeg farmasiilaha marka aad soo qaadanaysid dawadaada.



Austin Health acknowledges the Traditional Custodians of the land and pays its respects to Elders past, present and emerging.

Austin Health celebrates, values and includes people of all backgrounds, genders, sexualities, cultures, bodies and abilities.



9496 6888
口译员 傳譯員 INTERPRETE TERÇÜMAN ΔΙΕΡΜΗΝΕΑΣ
THÔNG DỊCH VIỆN ПРЕВЕДУВАЧ PREVODILAC مترجم فوري

Cinwaanka Dhukumentiga

Bukaanka: Doorashada inaad noqtid bukaan shakhsii ahaaneed

Patient Information: Choosing to be a private patient (Somali)

Haddii aan isticmaalo caymiskayga caafimaadka gaarka ah, ma la ii dammaanad qaaday hal qol?

Maya, qolalka keligiis ah ayaa mudnaanta la siiyaa iyadoo ku saleysan baahida bukaan-socod, khatarta caabuqa iyo badbaadada bukaanka.

Ma la ii wareejin karaa cusbitaal gaar loo leeyahay?

Adiga ayaa ikhtiyaar u leh in lagugu wareejiyo cusbitaal gaar loo leeyahay. Isku duwaha daryeelka ama kalkaalisada masuulka ah ayaa kaa caawin kara adiga ama qoyskaaga si aad u abaabushaan wareejinta haddii ay aaminsan yihiin inay amaan tahay in sidaa la sameeyo. Xaaladaha caafimaad qaarkood waxay u baahan yihiin khibrad iyo qalab kuwaas oo laga yaabo inaan laga helin nidaamka gaarka ah.

Haddii aad dooratid in laguu wareejiyo adeeg kale oo caafimaad oo aad u baahan tahay gaadiidka ambalaasta waxaad masuul ka noqon kartaa kharashka la xidhiidha. Waxaa lagugula talinayaa inaad la xidhiidhi caymiskaaga caafimaadka gaarka ah si aad u hubisid in siyaasaddaadu ay dabooshoo gaadiidka ambalaaska.

Heerarka caymiska caafimaadka gaarka ah waa kala duwan yihiin oo u wareejinta Cusbitaalka Gaarka ah waxay keeni kartaa inaad jeebka ka baxdo. Haddii aad ka fekereysid wareejinta, horay u wac cusbitaalka si aad u fahantid khidmadaha aad ka filan kartid heerkaaga caymiska.

Ma heli doonaa wax xisaabaad ah boostada?

Akowonadaada waxa si toos ah loogu diri doona Medicare iyo Sanduuqaaga Caafimaadka Gaarka ah.

Marmor dhif ah oo aad ku heshid qaansheegta boostada, fadlan kala xidhiidh Waaxda Adeegyada Dakhliga 9496 5554.

Su'aalaha soo noqnoqda

Maxaa dhacaya haddii sanduuqa caafimaadkaygu uu niyad jabiyo seexashada gaarka ah ee cusbitaalka guud?

Go'aanka aad ku isticmaalaysid caymiskaaga caafimaadka gaarka ah ee cusbitaalka dadwaynaha waa doorashadaada. Khasnaddaada caafimaad su'aal kama weydiin karto go'aankaaga.

Caymiskaygu ma kordhi doonaa?

Maya. Korodhka lacagta laguma go'aamiyo xaalad gaar ah. Inta jeer ee isticmaalka caymiskaagu ma kordhin doono lacagta caymiskaaga.

Heerka daboolkaygu ma isbeddel ku sameeyaa cusbitaalka dadweynaha?

Xaaladaha intooda badan daboolka aasaasiga ah ee cusbitaalka ayaa ku filan si loo daboolo



Cinwaanka Dhukumentiga

Bukaanka: Doorashada inaad noqotid bukaan shakhsii ahaaneed

Patient Information: Choosing to be a private patient (Somali)

cusbitaal dhigista cusbitaalka dadweynaha. Iyadoo aan loo eegin heerkaaga caymiska waxaanu samayn doonaa hubinta u-qalmitaanka waxaanan ku ogeysiin doonaa natijada. Haddii aadan u qalmin, waxaa laguula dhaqmi doonaa sidii bukaan dadweyne lacag la'aan.

**Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan
nala soo xidhiidh.**

Waaxda: Waaxda Adeegyada Dakhliga

Taleefanka: **9496 5554**

limayl: revenueservices@austin.org.au

Taariikhda la soo saaray: Maarsio 2022

Taariikhda dib u eegista: Maarsio 2025

